Wasaaradda Caafimaadka | Wasaaradda Waxbarashada

Ontario

Agabka qiimeynta Dugsiga iyo Xarunta Daryeelka Ilmaha Ee loogu talagalau shaqsiyaadka nidaamkooda jirka daciifka yahay ama kunool meelaha khataraha saa'idka ah kajiraan

Markii ugu dambeysay ee la cusbooneysiiyay: Agoosto 31, 2022

Taariikhda (bb-mm-ssss) _____

Haddii shaqsiga laga qaaday baaritaanka UUSAN lahayn nidaamka difaaca jirka[1] ama uu ku nool yahay goob daryeel oo ay u badan tahay in laga qaado caabuqa (tusaale ahaan, dugsiga isbitaalka, Barnaamijka Iskaashiga Bulshada iyo Waxbarashada), kani ma ahan agabka baaritaanka ee saxda ah. Agabka baaritaanka ee saxda ah waxaa laga heli karaa https://covid-19.ontario.ca/school-screening.

Shaqaalaha, ardayda, caruurta, iyo martida waa in laga baaraa cudurka maalin kasta ka hor inta aysan aadin iskuulka ama xarunta xanaanada carruurta. Waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaa midkaan buuxin kara ayagoo ka wakiil ah ilmaha ama ardayga.

Qof kasta oo xannuunsan ama leh astaamaha xannuun oo kasii daraya ama kuwo cusub isku arka, oo ay ku jiraan kuwa aan hoos lagu qorin, waa inuu joogaa guriga illaa astaamaha kasoo raynayaan muddo dhan 24 saacadood (ama 48 saacadood haddii ay dareemayaan lalabo, matag, iyo/ama shuban) waana inuu qofku raadsado qiimeyn uu ku sameyo dhakhtarkiisa daryeelka haddii uu u baahan yahay,

Su'aalaha baaritaanka

Su'aasha 1 aad, 2 aad, iyo 3 aad, waxaad oga jawaabi kartaa "Maya" dhammaan astaamaha **haddii dhammaan saddexda khuseeyaan**:

- Haddii astaamahaagu ay kasoo raynayeen ugu yaraan 24 tii saac ee lasoo dhaafay (48 saacadood haddii aad yeelatay lalabo, matag, iyo/ama shuban) **iyo**
- Haddii aadan dareemeyn qandho **aana**
- Lagaa helin caabuqa COVID-19 marka lagaa qaaday baaritaanka 1 PCR ama baaritaanka fudud ama baaritaanka 2 aad ee unugyada difaaca oo ay u kala dhaxeyso 24 illaa 48 saacadood.

1. Ma dareemaysaa wax kamid ah astaamahaan soo socda?

Dooro dhammaan ama mid kamid ah xaaladaha cusub, kuwa kasii daraaya, iyo xanuunnada ama dhibaatooyinka aan la xariirin xanuunnada la garanaayo.

Qandhada iyo/ama qarqaryo	☐ Haa	☐ Maya
Qufac Aan la xariirin cudurada kale ee la garanaayo (tusaale ahaan, cudurada sambabka ee dabada-dheer)	☐ Haa	☐ Maya
Neef ciriiri Aan la xariirin cudurada kale ee la garanaayo (tusaale ahaan, cudurka neefta, cudurka sambabka ee dabada-dheer, cudurada wadne istaaga keena)	☐ Haa	☐ Maya
Dhadhanka ama urta oo ka yaraatada ama ka go'da Aan la xariirin cudurada kale ee la garanaayo (tusaale ahaan, burooyinka sanka, xasaasiyada, cudurada dhimirka la xariira)	☐ Haa	☐ Maya

Haddii aad dhammaan su'aalaha oga jawaabto MAYA, u gudub su'aasha xigta.

1. Tusaale ahaan **daciifnimada difaaca jirka** waxyaabaha keena waxaa kamid ah daawada kemo ee kansarka, caabuqa HIV ee aan la daaweyn lehna tirada CD4 T lymphocyte oo ka yar 200, ciladaha isbiirsaday ee hoos u dhiga difaaca jirka, qaadashada wax ka badan 20 mg/maalintii (ama in u dhiganta) oo ah daawada prednisone muddo ka badan 14 maalmood, qaadashada daawooyinka kale ee hoos u dhiga nidaamka difaaca jirka. Marka la eego agabkaan qiimeynta, waxyaabaha lamidka ah da'da wayn, cudurka sonkorta iyo cudurada kalyaha ee heerka gabagabada ah maraaya guud ahaan looma arko inay kamid yihiin cudurada hoos u dhiga difaaca jirka.

Haddii aad kaga jawaabtay "HAA" mid ka mid ah astaamaha ku jira su'aasha 1 aad, ha aadin iskuul ama xarun xanaano iyo:

- Haddii la heli karo baaritaanka COVID-19, waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad marto baaritaanka 1 PCR ama baaritaanka fudud ee degdega ah (haddii aad u qalanto) ama baaritaanka nidaamka difaaca jirka ee 2 aad oo lagaa qaadaayo 24 ilaa 48 saacadood ayadoo ay u dhaxeyso (baaritaanka labaad looma baahna haddii baaritaanka koowaad cudurka sheego).
- Haddii aad halis ugu jirto inuu kugu dhaco cudur aad u daran, waa inaad isbaarto sida ugu dhaqsaha badan ee macquulka ayadoo la eegaayo waqtiga laguu qabto inaad ku qaadato daaweynta COVID-19. Waxaad ka faa'ideysan kartaa daaweynta la heli karo si aad oga hortagto cudurada aadka u daran. Waqti xaadirkaan, natiijada baaritaanka difaaca jirka ee togan ayaa ku filan in lagu bilaabo daaweynta COVID-19, si ay u helaan dadka u qalma, loomana baahna in lagu xaqiiji baaritaanaka PCR ama baaritaanka fudud ee degdega ah. Xog bada ka baro baaritaanka COVID-19 iyo dookhyada daaweynta adoo booqanaaya https://covid-19.ontario.ca/covid-19-clinical-assessments-and-testing.
- Haddii la heli karo baaritaanka COVID-19 aadna heshay natiijada aan sheegeyn cudurka kadib markii aad martay baaritaanka 1 PCR ama baaritaanka fudud ee degdega ah, ama baaritaanka unugyada jirka ee 2 aad oo lagaa qaada muddo ukala dhaxeysa 24 illaa 48 saacadood, waxaad dib ugu soo laaban kartaa dugsiga/xarunta daryeelka ilmaha haddii ugu yaraan laga soo wareegay 24v saacadood kadib markii astaamahaagu kasoo raayeyn (ama 48 saacadood haddii aad qabtay lalabo, matag, iyo/ama shuban) aadan dareemeyn wax qandho ah.
  - Kadib 10 maalmood markii ay billoowdeen astaamaha, taxadaradaan soo socda ayaa lagu dari karaa tallaabooyinka looga hortago inay faafaan fayrasyada kale ee neefmareenada ee ku dhex wareegto bulshada:
    - waa inaad xirato maaskaro si fiican kuu le'eg marka aad joogto meelaha dadku ku badan yihiin (oo ay kujiraan dugsiga ama xarunta daryeelka ilmaha)
    - iska ilaali nashaadaadka aan muhiimka ahayn ee lagaaga baahan yahay inaad iska bixiso maaskarada (tusaale ahaan, kuciyaarista qalabka dabeysha inta lagu jiro fasalka muusikada ama iska bixinta maaskaradaada si aad u ciyaarto ciyaaro; si aad wax u cunto)
    - iska ilaali inaad booqato qof nidaamka difaaca jirkiisu hooseeyo ama halis wayn ugu jiri kara inuu haleelo cudur (tusaale ahaan, dadka waawayn)
    - iska daa booqashooyinka aan muhiimka ahayn ee aad ku tagayso meelaha halista wayn kajirto sida isbitaalada iyo guryaha lagu daryeelka dadka cudurada dabadheer qaba.
- Haddii aadan iska baarin COVID-19 ama haddii lagaa helo COVID-19, **Joog guriga (iskarantiil) oo ha aadin dugsiga/xarunta xanaanada ilmaha ugu yaraan 10 maalmood** iyo illaa inta aad sidoo kale aadan ka dareemayn wax qandho ah astaamahaagana kasoo raynayaan muddo ugu yaraan dhan 24 saacadood (48 saacadood haddii aad isku aragtay lalabo, matag, iyo/ama shuban). Ha bixin ilaa inaad hesho baaritaan maahee, inaad booqato xarunta qiimeynta caabuqa, ama inaad hesho maahee daryeelka xaaladaha degdega ah. Haddii aad dareemayso astaaamo aad u waawayn sida xabad xanuun ama neef cariiri, booqo waaxda caafimaadka ee xaaladaha degdega ah ee kuugu dhaw.
  - Fadlan ogsoonoow haddii lagaa helo caabuqa COVID-19, waa inaad iskarantiisho muddo dhan 10 maalmood adoon u eegin in dib lagaaga waayo caabuqa iyo in kale inta aad iskarantiilka kuirto.

Fiiro gaar ah: Waxaa wax laga badeli karaa muddada iskarantiilkaaga ayadoo lagu saleynaayo tallooyinka dhakhtarkaaga.

- Walaalahaa iyo dadka kale ee aad la nooshahay waa inay sameeyaan arrimahaan soo socda 10 maalmood kadib marka ay la kulmaan qof qaba astaamaha COVID-19:
  - iska eegida astaamaha caabuqa. Waa inay sameeyaan iskarantiil isla markiiba haddii ay isku arkaan wax kamid ah astaamaha COVID-19 waana inay raadsadaan baaritaan haddii ay u qalmaan.
  - waa inaad xirato maaskaro si fiican kuu le'eg marka aad joogto meelaha dadku ku badan yihiin (oo ay kujiraan dugsiga ama xarunta daryeelka ilmaha)
  - waa inay iska ilaaliyaan nashaadaadka aan muhiimka ahayn ee looga baahan yahay iny iska bixiyaan maaskarada (tusaale ahaan, kuciyaarista qalabka dabeysha inta lagu jiro fasalka muusikada ama iska bixinta maaskaradaada si ay u ciyaaraan ciyaaro; si ay wax u cunaan)
  - waa inay iska ilaaliyaan inay booqdaan qof nidaamka difaaca jirkiisu hooseeyo ama halis wayn ugu jiri kara inuu haleelo cudur (tusaale ahaan, dadka waawayn)
  - iska daa booqashooyinka aan muhiimka ahayn ee aad ku tagayso meelaha halista wayn kajirto sida isbitaalada iyo guryaha lagu daryeelka dadka cudurada dabadheer qaba.

Ayadoon loo eegeyn natiijooyinka baaritaanka COVID-19 ee aan sheegeyn cudurka, taxadaradaan dheeraadka ah ayaa lagu dari karaa daraayo tallaabooyinka looga hortago in caabuqa COVID-19 faafo iyo in fayraska neefmareenka uu ku dhex wareegto bulshada.

- Uma baahnid inaad eegto su'aalaha kale ee haray ee kujira agabkaan maanta. Dib u samee baaritaanka agabka maalin kasta kahor inta aadan imaan dugsiga ama xarunta daryeelka ilmaha.

2. **Ma dareemaysaa wax kamid ah astaamahaan soo socda?**

Dooro mid walba ama dhammaan kuwa cusub, kuwa kasii daraaya, iyo astaamaha aan la xariirin cudurada ama xaaladaha aan la aqoon ee aad horey u qabtauy.

Murqo xanuun iyo xanuunka dhanka kala goysyada ah ☐ Haa ☐ Maya
Ee aan la xariirin cudurada sababa ee la garanaayo ama xaaladaha (tusaale ahaan, qaadashada talaalka COVID-19 iyo/ama talaalka hargabka inta lagu jiray 48 dii saacadood ee lasoo dhaafay, cudurka kalagoysyada, murqaha)

Daal Saaid ah ☐ Haa ☐ Maya
Dareemida guud ee caafimaad darada la xariirta, awood la'aan, aan la xariirin cudurada sababa ee la garanaayo ama xaaladaha (tusaale ahaan, qaadashada talaalka COVID-19 iyo/ama talaalka hargabka inta lagu jiray 48 dii saacadood ee lasoo dhaafay, walaac, hurdo la'aan, caabuqa qumanka, dhiig la'aan, caabuqa muujiya kansar)

Dhuun xanuun ☐ Haa ☐ Maya
Wax laqida oo xanuun ah ama aad u adkaata oo aana la xariirin xaaladaha ama xanuunada ilmuhu dareemo marka ilig usoo baxaayo (tusaale, dheecaanka sanka ka yimaada, xanuunada gaaska)

Biyo sanka ka yimaada ama san cabur/ciriiri ☐ Haa ☐ Maya
Aan la xariirin cudurada ama xaaladaha kale ee la garanaayo (tusaale ahaan, xasaasiyad xiliyeedka, joogista banaanka ayadoo uu jiro qaboow, caburka)

Madax xanuun ☐ Haa ☐ Maya
Aan la xariirin cudurada ama xaaladaha kale ee la garanaayo (tusaale ahaan, qaadashada talaalka COVID-19 iyo/ama talaalka hargabka inta lagu jiray 48 dii saacadood ee lasoo dhaafay, madax wareerka jahwareerka ah, goonjabka dabada-dheer)

Lalabo, matagid iyo/ama shuban ☐ Haa ☐ Maya
Aan la xariirin cudurada ama xaaladaha kale ee la garanaayo (tusaale ahaan, mataga yimaada marka ilmuhu dareemaan qiidsanaan, xanuunada kale ee jirka, calool istaag, caabuqa caloosha, dhibaatada daawadu keenayso)

Haddii aad dhammaan su'aalaha oga jawaabto MAYA, u gudub su'aasha xigta.

Haddii aad ku jawaabtay HAA labo ama in kasii badan oo kamid ah astaamaha ku qoran su'aasha 2 aad, raac tilmaamaha ku hoos qoran "haddii aad dhahday HAA mid kamid ah astaamaha su'aasha 1 aad."

Haddii aad kaga jawaabtay HAA hal astaan oo kujirta su'aasha 2 aad, ha aadin iskuul ama xarun xanaano iyo:

- Joog guriga ilaa astaamuhu kasoo raynayaan muddo ugu yaraan dhan 24 saacadood (ama 48 saacadood haddii aad lahayd lalabo, matag, ama shuban) haddiiba aadan qabin qandho,
- Walaalahaa ama dadka kale ee kula nool looma baahna inay joogaan guriga haddiiba aysan dareemeyn astaamaha caabuqa.
- Uma baahnid inaad eegto su'aalaha kale ee haray ee kujira agabkaan maanta. Dib u samee baaritaanka agabka maalin kasta kahor inta aadan imaan dugsiga ama xarunta daryeelka ilmaha.

3. **Ma dareemaysaa wax kamid ah astaamahaan soo socda?**

Dooro mid walba ama dhammaan kuwa cusub, kuwa kasii daraaya, iyo astaamaha aan la xariirin cudurada ama xaaladaha aan la aqoon ee aad horey u qabtauy.

Xanuun uur kujirta hoose ☐ Haa ☐ Maya
Aan la xariirin cudurada ama xaaladaha kale ee la garanaayo (tusaale ahaan, caaddo wareerka, cudurka gaaska)

Indho caseeyaha ☐ Haa ☐ Maya
Aan la xariirin cudurada ama xaaladaha kale ee la garanaayo (tusaale ahaan, bararka indhaha, burooyinka baalka indhaha kasoo baxa)

Hoos u dhaca ama Oomateeg la'aanta (carruurta yaryar oo kaliya) ☐ Haa ☐ Maya
Aan la xariirin cudurada ama xaaladaha kale ee la garanaayo (tusaale ahaan, walaaca, calool istaaga)

Haddii aad dhammaan su'aalaha oga jawaabto MAYA, u gudub su'aasha xigta.

Haddii aad kaga jawaabtay HAA mid kamid ah astaamaha ku qoran su'aasha 3 aad, ha aadin iskuul ama xarun xanaano iyo:

- Joog guriga illaa astaamahaagu kasoo raynayaan muddo ugu yaraan dhan 24 saacadood.
- Walaalahaa ama dadka kale ee kula nool looma baahna inay joogaan guriga haddiiba aysan dareemeyn astaamaha caabuqa.
- Uma baahnid inaad eegto su'aalaha kale ee haray ee kujira agabkaan maanta. Dib u samee baaritaanka agabka maalin kasta kahor inta aadan imaan dugsiga ama xarunta daryeelka ilmaha.

4. **Ma laguu sheegay inaad waqtigaan lagaa rabay inaad kujirto iskarantiil, isgo'doomi, aadna joogto guriga, ama inaadan imaan dugsiga ama xarunta daryeelka ilmaha?** ☐ Haa ☐ Maya

Waxaa kujiri kara tallada uu kusiiyo dhakhtarka, daryeel bixiyaha caafimaadka, waaxda caafimaadka dadwaynaha, wakaalada xaduuda ee federaalka, ama laan kale oo kamid ah dawlada.

Fadlan ogsoonoow inay jiraan shuruudo federaal (https://travel.gc.ca/travel-covid) oo looga baahan yahay inay racaan shaqsiyaadka u socdaalay meelo ka baxsan Canada, xataa haddii ay yihiin meelo aan karantiil loo gelin.

Haddii aad ku jawaabtay MAYA, u gudub su'aasha xigta.

Haddii aad kaga jawaabtay HAA su'aalaha 4 aad, ha aadin iskuul ama xanaano caruur.

- Joog guriga hana bixin ilaa inaad hesho baaritaan maahee, inaad booqato xarunta qiimeynta caabuqa, ama inaad hesho maahee daryeelka xaaladaha degdega ah.
- Raac tilmaamo kasta oo kale ama tilmaamaha lagugu siiyay
- Walaalahaa iyo dadka kale ee kula nool ma ahan inay joogaan guriga illaa in loo sheego maahee inay iskarantiilaan, isgo'doomiyaan, ama joogaan guriga.
- Uma baahnid inaad eegto su'aalaha kale ee haray ee kujira agabkaan maanta. Dib u samee baaritaanka agabka maalin kasta kahor inta aadan imaan dugsiga ama xarunta daryeelka ilmaha.

5. **Intii lagu jiray 10 kii maalmood ee u danbeeyay ma lagaa helay COVID-19?** ☐ Haa ☐ Maya

Tani waxaa kujira natiijada baaritaanka COVID-19 ee caabuqa sheegaysa ahna baaritaanka la xariira PCR, baaritaanka adag ee unugtada difaaca, baaritaanka fudud ee degdega ah ama agabka baaritaanka lagu sameeyo guriga.

Haddii aad ku jawaabtay MAYA, u gudub qaybta hoose "Haddii aad ku jawaabtay "maya" dhammaan su'aalaha."

Haddii aad kaga jawaabtay HAA, ha aadin iskuul ama xanaano caruur:

- Waa inaad iskarantiisho aadana aadin dugsi/xarunta daryeelka ilmaha muddo ugu yaraan dhan **10 maalmood**.
- Haddii aad isku aragto astaamo, ha aadin dugsiga/xarunta xanaanada ilmaha ugu yaraan **10 maalmood** iyo ilaa inta aad sidoo kale kaa baaba'ayso qandhada astaamuhuna kasoo raynayaan muddo ugu yaraan dhan 24 saacadood (48 saacadood haddii aad isku aragtay lalabo, matag, iyo/ama shuban). Ha bixin ilaa inaad booqanayso maahee xarunya qiimeynta caafimaadka ama xarunta xaaladaha degdega ah ee caafimaadka.

Fiiro gaar ah: Waxaa wax laga badeli karaa muddada iskarantiilkaaga ayadoo lagu saleynaayo tallooyinka dhakhtarkaaga.

- Haddii aad halis wayn ugu jirto cudurada aadka u daran, la xariir dhakhtarkaaga maadaama laga yaabo inaad u qalanto daaweynta COVID-19.
- Walaalahaa iyo dadka kale ee aad la nooshahay waa inay sameeyaan arrimahaan soo socda 10 maalmood kadib marka ay la kulmaan qof qaba astaamaha caabuqa oo laga helay caabuqa COVID-19:
  - iska eegida astaamaha caabuqa. Waa inay sameeyaan iskarantiil isla markiiba haddii ay isku arkaan wax kamid ah astaamaha COVID-19 waana inay raadsadaan baaritaan haddii ay u qalmaan.
  - waa inay xirtaan maaskaro si fiican u le'eg marka ay joogaan meelaha dadku ku badan yihiin (oo ay kujiraan dugsiga ama xarunta daryeelka ilmaha)
  - waa inay iska ilaaliyaan nashaadaadka aan muhiimka ahayn ee looga baahan yahay iny iska bixiyaan maaskarada (tusaale ahaan, kuciyaarista qalabka dabeysha inta lagu jiro fasalka muusikada ama iska bixinta maaskaradaada si ay u ciyaaraan ciyaaro; si ay wax u cunaan)
  - waa inay iska ilaaliyaan inay booqdaan qof nidaamka difaaca jirkiisu hooseeyo ama halis wayn ugu jiri kara inuu haleelo cudur (tusaale ahaan, dadka waawayn)

- waainay iska daayaan booqashooyinka aan muhiimka ahayn ee ay ku tagayaan meelaha halista wayn kajirto sida isbitaalada iyo guryaha lagu daryeelka dadka cudurada dabadheer qaba.

Haddii aad kaga jawaabtay MAYA dhammaan su'aalaha, cunugaagu wuxuu aadi karaa iskuulka/xarunta daryeelka ilmaha.

Haddii aad dareemeyso xanuun ama aadan caafimaad qabin, xataa haddii aadan isku arkin astaamaha qiimeynta ee hoos ku xusan, waa inaad joogto guriga. La hadal dhakhtar haddii ay muhiim tahay. Shakhsiyaadka qaba xanuuno khatar ah ee u baahda xanaano degdeg ah waa in ay aadaan waaxda caafimaadka degdegta ah ee ugu dhow.

Dib u samee baaritaankaan maalin kasta kahor inta aadan aadin dugsiga/xarunta daryeelka ilmaha.

Haddii la oggaado inaad u dhawaatay qof qaba astaamaha caabuqa ama COVID-19, muddo dhan 10 maalmood kadib markaad u dhawaatay qofka:

- waa inaad xirato maaskaro si fiican kuu le'eg marka aad joogto meelaha dadku ku badan yihiin (oo ay kujiraan dugsiga ama xarunta daryeelka ilmaha)
- waa inaad iska ilaaliso nashaadaadka aan muhiimka ahayn ee lagaaga baahan yahay inaad iska bixiso maaskarada (tusaale ahaan, kuciyaarista qalabka dabeysha inta lagu jiro fasalka muusikada ama iska bixinta maaskaradaada si aad u ciyaarto ciyaaro; si aad wax u cunto)
- waa inaad iska ilaaliso inaad booqato qof nidaamka difaaca jirkiisu hooseeyo ama halis wayn ugu jiri kara inuu haleelo cudur (tusaale ahaan, dadka waawayn);
- isla ilaali booqashooyinka aan muhiimka ahayn ee aad ku tagayso meelaha halista wayn kajirto sida isbitaalada iyo guryaha lagu daryeelka dadka cudurada dabadheer qaba.

Ayadoon loo eegeyn natiijooyinka baaritaanka COVID-19 ee aan sheegeyn cudurka, taxadaradaan dheeraadka ah ayaa lagu dari karaa daraayo tallaabooyinka looga hortago in caabuqa COVID-19 faafo iyo in fayraska neefmareenka uu ku dhex wareegto bulshada.

Haddii aad qaadatay talaalka COVID-19 ama talaalka hargabka inta lagu jiray 48 dii saac ee lasoo dhaafay aadna dareemeyso daal, murqo xanuun/xanuun meelaha lalaabka ah, iyo/ama madax wareer:

- Waa inaad xirato maaskaro si fiican kuu le'eg guud ahaan inta aad joogto dugsiga/xarumaha daryeelka ilmaha ahaddii aad dareemeyso daal khafiif ah/tabardaro, murqo xanuun, iyo/ama xanuunka meelaha lalaabka ah oo kugu billoowday kadib markii aad qaadatay talaalka.
- Haddii astaamahaagu kasii daraan, ayna sii socdaan muddo ka badan 48 saac, ama haddii aad isku aragto astaamo kale: waa inaad ka tagto dugsiga/xarunta daryeelka ilmaha isla markiiba.

Haddii aad u socdaashay meel ka baxsan Canada 14 kii bari ee lasoo dhaafay

- Waa inaad raacdo tilmaamaha federaalka (https://travel.gc.ca/travel-covid) kadib marka aad kusoo laabato Canada, xataa haddii aan lagaa dooneyn inaad gasho iskarantiil.

Tilmaamaha caafimaadka iyo badqabka

Meesha ka saarista qodobada shuruudaha lama micno ahan in halista COVID-19 dhaafay. Waxaan u baahanahay inaan kasoo baxno qaybteena si aan isku ilaalino aana dadka kale oga ilaalino COVID-19 Tani waxaa kujira joogteynta nadaafada gacmaha ee wanaagsan iyo xirashada maaskarada marka aan joogno meelaha ay tahay in lagu xirto ama nalooga baahan yahay.

Qaadashada talaalka COVID-19 iyo talaalka kale ee joogtada ah marka aan u qalano.

Talaaladu waa badqab, waana kuwo wax ku ool ah, waana qaabka ugu wanaagsan ee aad isku ilaalinayso aadna oga ilaalinayso dadka inuu ku dhaco caabuqa. Xog badan ka oggoow: https://www.ontario.ca/page/vaccines

© King's Printer for Ontario, 2022